




Baaritaanka loogu tallagalay kansarka naasaha



Haddii da'daada u dhixeyso 50 iyo 69, waxaa lagaa baari karaa kansarka naasaha. Baaritaanka waa baaritaan lagu sameeyo dumarka aan laheyn calaamadaha kansarka naasaha. Waxaa jira fursado wanaagsan ee daaweynta haddii kansarka naasaha goor hore la ogaado.

Maamulka Caafimaadka Danishka wuxuu ku talinaya baaritaanka kansarka naasaha. Laakiin waa muhiim ah inaad adiga laftaada go'aanka gaarto.

Maxaa laguugu martiqaaday baaritaanka?

Haddii kansarka naasaha goor hore la ogaado, fursadaha daaweynta ayaa wanaagsanaada. Sidaa darteed, ayaa laguugu martiqaaday baaritaan in kastoo xittaa aadan laheyn calaamadaha kansarka naasaha.

Xittaa haddii lagu baaro, waxaad weli yeelan kartaa ama kugu dhici karaa kansarka naaska. Sidaas darteed, waa inaad had iyo jeer la xiriita dhaqtarkaaga haddii aad isku aragtid astaamaha sida:

- Buro adag oo aan xanuun lahayn
- Dib u noqoshada maqaarka ama ibta naaska
- Dheecaan cad ama dhiig leh oo ka imaanaya ibta naasaha
- Barar, qanjiro adag ee kilkisha

Sidee loo sameeyaa baaritaanka?

Baaritaanka waa raajo laga qaado labada naasba (baaritaanka raajada naaska). Haddii baaritaanka uusan keenin shakiga kansarka naasaha, waxaa laguugu deeqayaa baaritaan kale muddo qiyastii laba sanno kadib.

Haddii baaritaanka muujiyo inaad qabtid kansarka naasaha, waxaa laguugu deeqayaa baaritaano dheeraad ah oo naasahaaga ah, 14 maalmood gudahood.

Gobolkaaga ayaa ka jawaabi karo su'aalahaaga

Gobolkaaga ayaa ka jawaabi karo su'aalo kasta oo ku saabsan baaritaanka iyo marka la gaaro waqtiga baaritaan cusub.

Gobolka Waqooyiga Denmark

- Aalborg ama Thisted: Wixii baaritaan ah soo wac +45 97665070
- Frederikshavn: Wixii baaritaan ah soo wac +45 97641297

Gobolka dhexe Denmark telefonka +45 78420170

Gobolka Koonfurta Denmark telefonka +45 65411603

Region Zealand telefonka +45 47320820

Gobolka Caasimada ee Denmark telefonka +45 38671760

Waa maxay faa'iidooyinka baaritaanka?

- Waxaa jira fursado daaweyn wanaagsan haddii kansarka goor hore la ogaado. Ka qeybqaadashada baaritaanka, waxaad yareyn kartaa halista inaad u dhimato kansarka naasaha.
- Haddii kansarka goor hore la ogaado, waxaa jirta fursad sare oo laguugu siin karo qalliuu lagu ilaa liyo naasaha. Wuxaad sidoo kale ka hortagikartaa in qanjirada kilkilahaaga lagaa saaro. Wuxaad sidoo kale yareen kartaa khatarta ah inaad u baahato daaweyn caafimaad sida daaweynta kiimikada.

Waa maxay khasaaraha baaritaanka?

- Xaaladaha qaarkood, baaritaanka ayaa laga yaabaa in lagu ogaado kansarka naasaha, kaas oo aan saameyn ku yeelaneyn noloshaada. Ka qeybqaadashada baaritaanka, waxaad halis u galii kartaa inaad hesho daaweyn aan loo baahneyn – oo suurtogal ah – in ay waxyeelo xun kuu gaysato.
- Haddii baaritaanka muujiyo inaad qabtid kansarka naasaha, waxaa lagu siinayaa baaritaano dheeraad ah, laakiin lama hubo inaad qabtid kansarka naasaha. Shakiga wuxuu noqon karaa isbedelada burada ah ama unugyada naasaha cufan. Muddada aad sugeysid natijjooyinka baaritaanka waxay keeni kartaa walaac. Xittaa haddii baaritaanka uusan ogaan kansarka naasaha, si kastaba waxaa laga yaabaa inaad qabtid ama uu kugu dhaco kansarka naasaha.
- Haweenka qaarkood waxay la kulmaan raaxo la'an iyo xanuu maadaama naasaha la dhuujiyo inta lagu jiro baaritaanka.

Waxaa ka aqrin kartaa wax ku saabsan kansarka naasaha iyo barnaamijka baaritaanka www.sst.dk/screening ama adigoo ku sawiraya **koodhka QR** kaamirada taleefonkaaga.

